



Washington State Department of
CHILDREN, YOUTH & FAMILIES

PD Newsletter



Nadabey, Xagaaga!

Waa wargayska sadexdii biloodlaha ah ee Washington State Department of Children, Youth, and Families (DCYF) waxaana loogu talo geley in bushqada Washington ee waxbarashada hore uu la socodsiiyo si joogto ah dhamaan qaybah shaqooyinka wanaagsan si ay u sameeyaan [Hormar Xirfadeed](#).



Wargeyskan...

- Wax Ka Baddalka Tabobarka
- [Toboranayaasha Gobolku Ansixiyay & Boga Cusub ee Xirfadlayaasha Hormarka Xirfadlaha Xidhiidhka Ku Salaysan \(Relationship Based Professional Development, RBPD\)](#)
- [Shirka Caruurta, Dhalinyarta, iyo Qoysaska Dhaladka ah](#)
- [Taxanaha Webinar-ka Xagaaga](#)
- [Caawinta Shagaalaha Barashada Hore Ee Waxbarashada](#)
- [Khayraadka Lagu Qiimeeyo Duruusta Waxbarashada Caruurnimada Hore \(Early Childhood Education, ECE\)](#)
- [Joogto Ugu Xidhnaw](#)
- [Fariin ka socota Xogyahaha DCYF](#)
- [Coronavirus - Maclummaadiisii Ugu Danbeeyay ee COVID-19](#)
- [Wax ra'yi ah!](#)

Wax Ka Baddalka Tabobarka

Waxaan u Baahnahay Saacado Tobobar ah!

Waa maxay Ikhtiyaaradaydu?

DCYF waxay haysaa dhawr ikhtiyaar oo lagu xoojinayo dhamaan dhinacyada kala duwan ee doorbidaanka waxbarashada. Waxey ku jiraan:



- **Tobobarka Gobolku Ansixiyay**

- Onlayn
- Qaab Dhac Shakhsii Ahaaneed
- Isku Dar
- Shakhsii Ahaan (*ka xadidan tilmaamaha COVID-19*)

- **Tobobarka Aanu Gobolku Ansixin**

- Wixii khibrad waxbarasho ee lagu qaatay tobobarka gobolku aanu ansixin, waxaad soo gudbin kartaa arjiga Qorshsha Waxbarasho e Sii Soconaya (Continuing Education Proposal, CEP). Ikhtiyaarkani waxa uu u ogolaanayaa dadka ka qayb galayaasha ah inay dalbadaan saacadaha Tobobarka Iyo Nidaamka Duwaan Gelinta Gobolka (State Training And Registry System, STARS) ee tobobarka laga qayb galo. Tani waxaa kamid ah tobobarka shakhsii ahaaneed, online iyo/ama shirarka. *Ma jiraan wax xadidaad ah oo saacadaha aad u isticmaali karto ikhtiyaaradan.*

- **Duruusta Kuuliyada**

- Si aad u hesho saacadaha Adeegyada sanadkii ee duruusta kuuliyada ee la xidhiidha [Aagaga Waxku Oolka Asalka ah ee Waxbarashada Caruurnimada Hore \(Early Childhood Education Core Competencies Areas\)](#), dhamaystirka qaypta Duruusta Kuuliyada ee Arjiga Waxbarashada Agabka Macluumaadka Duwaan Gelinta iyo Waxbarashada La Maamulay (Managed Education and Registry Information Tool, MERIT) iyo nuqulada la gudbiyay ee qoraalka aan rasmiga ahayn ee [Centralia MERIT](#).
- Kaliya ilaa sadex daris ayaa lasoo gudbin karaa sanadkii. Dhamaan duruusta waa in lagu dhamaystiraa sadexdii sano ee lasoo dhaafay.

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan CEP iyo dhibcaha kuuliyada duruusta waxaa laga heli karaa bogeena Taageerada [MERIT Support page](#).

Halkee ayaan ka heli karaa Tobobar?

Waxaa jira dhawr meelood oo aad tobobarka ka eegi karto. Hadii aad doon doonayso tobobar bilaash ah, waxaa jira khayraadyada sida:



- [Daaqada Tobobarka DCYF](#)

- [MERIT](#)

- Foolka-fool iyo online ahaan waxaa laga heli karaa qaada Helitaanka Tobobarka.

- **Ciday wada shaqaynta leeyihii DCYF:**

- [Child Care Aware](#)
- [School's Out Washington](#)
- [Cultivate Learning](#)
- [Imagine Institute](#)
- [Whatcom College Tobobar Kharashka La Kaabay](#)

Hadii aad u baahan tahay tobobar dheeraad ah ama aad doonayso inaad qorshaysato todobarka xaruntaada oo dhan ama barnaamijka xidhiidhka [kooxda Hormarka Xirfada](#).

Soo Socda Dhawaan

Daryeelka Ilmaha Aas Aasiga ah oo Online ah (Online Child Care Basics, CCB)


Laga bilaabo bishan, ka qayb galayaashu waxay ka qayb geli doonaan tijaabinta tobobarka onlineka ah ee tobobarka tijaabada ah. Way ku mahadsan yihiin dhamaan inta rabitaanka muujisay.

Tobobarka CCB ee online-ka ah waxa si balaadhan loo heli karaa Oktoobar. Waxa aad ka heli kartaa tobobarka [Daaqada Tobobarka DCYF](#) iyada oo Ingiriisi iyo Isbaanidh ah.

[Ikhtiyaaro dheeraad ah](#) oo buuxinta shuruudaha Daryeelka Ilmaha ee Aas Aas ayaa sidoo kale la heli karaa.



Kordhinta Tayada Waxbarashada Hore (Enhancing Quality Early Learning, EQEL)



Laga bilaabo Sebteember, 10 saacadood ee ugu horeeya EQEL waxaa lagu heli doonaa Ingiriisi iyo Isbaanish. Tani waxay buuxin doontaa saacadaha adeegyada.

DCYF waxay uu ansixiyay EQEL kale oo ay ku jiraan:

- Dhamyatirka Tobobarka Heerka 2 ee Early Achievers
- Dhammaystirka duruusta soo socota ee ku jira Shahaadada Habaynta ECE:
 - Hordhaca ECE (ECED&105)
 - ECE Practicum (ECED&120)
 - Tilmaamaha Habdhaqanka (EDUC&130)
- Dhabada Tobobarka Barnaamijka Kaalmada Waxbarashada Caruurnimada Hore (Early Childhood Education Assistance Program, ECEAP)/HS (*faahfaahintu dhawaan ayay soo socdaan*)

Hadii aad ku buuxisay EQEL mid kamid ah liiska qaababka kale, EQEL waxay noqon kartaa dariiq ikhtiyaar tobobarka adeega ama waxa aad sii wadan kartaa doorashada mawduucyada tobobarkaaga.

Guudmarka Dhamaan Tobobarada

Tobobarada gaarka ah iyo wakhtiyada lagu dhamaystirayo waxay ku xidhan tahay kaalintaada.

Si aad u aragto liiska dhamayskatiran ee kaalimaha, tobobarada iyo wakhtiyada, akhri [Shuruudaha Tobobarka oo Waxaad Wakhtiga Ku Buuxisaa waraagaha](#).



Toboranayaasha Gobolku Ansixiyay & Boga Cusub ee Xirfadlayaasha Hormarka Xirfadlaха Xidhiidhka Ku Salaysan (Relationship Based Professional Development, RBPD)



Waxa aad heshaa Tobobar Gobolku Ansixiyay iyo macluumaadka Hormarka Xirfadalaха Xidhiidhka Ku Salaysan ee macluumaadka cusub ah [boga Khidadaha Hormarka Xirfadaha](#).

Waxaad eegtaa!

Shirka Caruurta, Dhalinyarta, iyo Qoysaska Dhaladka ah

Shirka Caruurta, Dhalinyarta, iyo Qoysaska Dhaladka ah ee Washington waxa uu dhacayaa Agoosto 11-12.

Tani waa fursad wayn oo la iskugu imanayo oo wax lagaga baranayo, iyada oo diirada lagu saarayo ilmaha iyo qoyska badqabkiisa, Sharciga Badqabka Ilmaha Hindiga ah iyo Waxbarashada Hore.

DCFY waxay ka shaqaynaysaa bixinta Adeegyada (saacada STARS) ee madalaha qaar. Faahfaahinta waxaa ku jira agabka shirka.

Isduwaan gelitu waxay xidhmaysaa Julaay 31, markaa waxaad sugtaa booskaaga!



Credit: Terrance Paul, a Yakama Nation Tribal Member and class of 2020 graduate from White Swan High School

Taxanaha Webinar-ka Xagaaga

Taxanaha Webinar-ka Xagaagu waxa uu diirada saarayaa jawaabtaada.

Waxa aanu fahansanahay in safmarka COVID-19 inuu khalkhaliyay nololaha maalintii oo uu keeney caqabad oo waxa aanu doonaynaa in aanu maclumaadkaaga helno.



Webinarka Agoosto & Sebteember



Agoosto iyo Sebteember waxay dhici doontaa Talaatada sadexaad ee bil kasta 6 galabnimo. Webinarada waxaa diirada lagu saari doonaa maclumaadka laga helo mawduucyada soo socda:

- Barnaamijka Tobobarka Gobolku Ansixiyay
- Isticmaal khibradahaaga websaytka Hormarinta Xirfadaha DCYF iyo khyraadyada

Waxaad la socotaa faahfaahinta webinar iyo maclumaadka is duwaan gelinta.

Fadlan oggow, qaabka uu u samaysan yahay webinar-ku dartiis, webinaaradan lama duubi doono. Hadii aanad iman karin Talaatooyinka, waxa aanu soo dhawaynaynaa fikrikaaga. Fadlan u soo dir wixii faalooyin ah [Marlene White](#).

Milicsiga Duwaanka Hore

Ma waxaad iswaydiinaysaa mawduucyada lagu soo qaadan doono Hormarka Xirfadaha webinarka hore? Dhawr mawduuc oo ay ku jiraan:

- [Tobobarka Naxariista](#)
- [Guudmarka Shahaadooyinka Shaqaalaha](#)
- [Dhaxsocodka Qaybta Websaytka Xarunta ee MERIT](#)
- [Daryeelka Ilmaha ee Aas Aasiga ah - Sida Loo Buuxinayo & Duubayo](#)



Webinaaro dheeraad ah, waxaa kamid ah sameeyaha wakhtiga, waxaana laga heli karaa [boga Wargeysyada iyo Webinarada](#).

Caawinta Shaqaalaha Barashada Hore Ee Waxbarashada

DCYF way garanaysaa qiimaha waxbarashada iyo shaqooyinka loo igmanayo cida lala shaqeeyo e bulshada waxbarashada sare si loo qaabeeyo oo loo buuxiyo barnaamijyo waxbarasho oo kala duwan si loogu taageero shaqaalaha waxbarashada hore.



Deeqaha Waxbarashada Early Achivers, Sheegooyinka Guulaha



Terry Miethe

Magacygu waa Terry, waxa aan soo maray safar cajiib ah kaas oo noloshayda wax u taray sanado badan. Waxa aan ku jiray waxbarashada caruurnimada hore sanado badan. Waxa aan bilaabay barnaamijka tijaabada ee kowaad (Shaqaalaha Hormarka Ilmaha (Child Development Associate, CDA)) barnaamijka Shaqaalaha Hormarka Ilmaha. Waxa aan sidoo kale jecelahay wax u dhigista caruurga oo waxa kordhay rabitaankayga arrintaas sanado badan. Waxa aan arkay isbadalo aad u badan oo barnaamijkan caruurnimada hore ah. Waxa aan aad ugu faanaa in aan qayb ka ahay kooxdan waxbarashada ee cajiibka ah. Waxa aan ku mahadnaqaa inaan helo fursada aan kaga mid noqonayo waxbarashada oo aan naftayda ku hormarinayo. Shaqadani mar kasta way is badashaa, waxaana lagama maarmaan ah in isbadalkan qayb laga noqdo. Early Achievers waxa uu i siiyay fursad aan ugu noqonayo dugsiga oo aan ku helayo diblooma. Safarkayga cusubi waa in aan wax u dhigo dadka yaryar ee kusoo biiraya mihnadan ee ila wadaaga rabitaankayga caruurga oo ay la socoto rabitaanka waxbarashadooda.

-Terry, Waxbarashada Caruurnimada Hore ee Kuuliyada Bulshada Spokane Falls

Sarah Ivanhoe

Wakhti wakhitiyada kamid ah, waxa aan jeclaa in aan noqdo dhakhtar xoolo ama dhakhtarada xayawaanka beeraha, laakiin waxa ay taasi u baahanayd waxbarasho badan oo waxbarashaduna way igu adkayd, markaa maadaama oo waxbarashadu igu adkayd, kaliya waxa aan doonayay waxay ahayd in aan dhameeyo. Ma sawiran karin in aan ku noqdo ikhtiyaarkayga. Waxa aan taas ku hayay maanka sanado badan, oo waxa aan galay mihnado kale, kuwaas oo aan u baahnayn sanado badan oo kuuliyad ah. Waxa aan markaa heley shahaadadaydii ugu horeysay ee qurxinta, kadibna timo jare. Labaatan sano kadib, waxa ilasoo daristay in aan kala tagnay ninkaygii oo aad iigu tacadiyi jiray oo waxa aan arkay aniga oo guri aan dago u baahan aniga iyo caruurtaydu. Waxa aan bilaabay in aan caruurga u hayo asxaabtay. Waxa ay taasi ii horseeday in aan barto oo aan daryeelka ilmaha siiyo Asxaabta, Qoyska iyo Jaarka barnaamijka ah ee ay bixiso DSHS.



Maalin maalmaha kadmid ah aniga iyo ninkayga (wakhtigan), waxa ilasoo hadlay wakiil ka socda Ururka Deegaanka Caalamiga ah ee Adeega Shaqaalaha (Service Employees International Union Local, SEIU), waxa ay iiga warantay ururka oo waxa ay ii sheegtey fasalo soo socda oo aan dhigan karo. Waan isku duwaan geliyay. Markaas aan bilaabayay fasalka waxa aan ka fikirayay in aan samaysto xarun guriga ah oo qoyska ah oo liisan haysata oo caruurga lagu daryeelo laakiin maan garanayn sida aad u samaynayo. Qof meesha joogay ayaa ii sheegay inaan galo boga Imagine emporium si aan u galo tobobar, 8 saacadood gudaheed markii aan xareeyay arjiga waxa la ii diyaariiyay tobobare meesha aan joogo iigu dhaw. Markii aan la kulmay, waxaa kamid ahaa waxyaabaha ay ii sheegtey waxa uu ahaa deeqda waxbarashada

Early Achievers iyo markaa in aan u qalmo inaan helo liisan. Markiiba waan doonay.

Waxa aan dhameeyay tobobarkaygii oo waxa aan la kulmay dhawr caqabadood laakiin waxaan heley liisankii! Waxa aan la xidhiidhay Kim Doyle oo aan kala hadlay deeqda waxbarashada waxayna ii soo dirtay macluumaadka, oo waxa aan is arkay aniga oo 45 jir ah, oo markii ugu horeysay noloshayda galaya kuuliyad. Iimay suurto gasheen inaan galo kuuliyad hadii aanan helin deeqdan waxbarasho, isakaba daa inaan qaato AA e. Hadana waa i kan oo waxa aan ka heley 36 dhibcood markii la ii wareejiyay AA, maadaama oo Early Achievers iyo barnaamijka deeqda waxbarashu i saacideen. Mahadsanid.

--Sarah, Kuliadaha Bulshada ee loo yaqaan 'Whatcom Community College', barnaamijka ECE



Maclumaadka Ugu Danbeeyay ee Waxbarashada Caruurnimada Hore ee Kuuliyada Bulshada Spokane Falls



Waxbarashada Caruurnimada Hore waxa ay dhaqan gelisay isbadalka loo baahnaa ee COVID-19.

Shuruudaha Practicum way adag yihiiin ee aqooniyahanada xarumahooda la xidhay. Barnaamijka iyo kuuliyadu waxay ka wada shaqeeyaan inay kordhiyaan ikhtiyaarada si ay u waafaqaan heerarka kuuliyada iyo barnaamijka ee ardaydan iyo in si loo xaqiijyo in qalinqabintu ayna dib uga dhicin cidna COVID-19 datiis.

Sidoo kale, barnaamiju waxa uu bixiyaa fursado la balaadhiyay oo uu siiyaa ardayda taas oo la xidhiida xidhiidhka iyo isdhaxgalqa dhaxdooda iyo sidoo kale hogaamiyayaasha bulshada ee qadarinta mudan.



"Kuuliyada Bulshada Spokane Falls iyo Deeqda Early Achievers si wayn ayay ii caawiyeen! Wuxaan ku mahadnaqayaa wax kasta"-Spokane Falls C.C.Ardy

Waxbarasho iyo Deeqda Waxbarasho




Si aad ula socoto maclumaadka barnaamijyadan iyo waxbarashada kale khayraadka, booqashada [boga Waxbarashada iyo Deeqaha Waxbarashada DCYF](#)

Khayraadka Lagu Qiimeeyo Duruusta Waxbarashada Caruurnimada Hore (Early Childhood Education, ECE)

Miyaad is waydiinaysaa hadii dhibcaha kuuliyada loo arko inay buuxiso Shuruudaha Shaqalaha?

Tilmaamaha [Duruusta Caruurnimada Hore Qiimayntooda](#) waxaa weeye agab kaa caawinaya inaad aragto sida qof dhubcihiisa waxbarashada sare ay u waafaqayso Dadaalka Asalka ah si loo buuxiyo Shahaadooyinka Shaqaalaha.



Joogto Ugu Xidhnaw

Waxaa jira dhawr dariiqo oo aad kula xidhiidhayo dhamaan waxa aad u baahan tahay ee la xidhiidha Xirfadlahaa Waxabrahada iyo tobobarka.

- Kaydso [boga Hormarka Xirfada](#).

The screenshot shows a website for the Washington State Department of Children, Youth & Families. The top navigation bar includes links for Safety, Services, Our Practice, Tribal Relations, and About. A large banner image features a close-up of hands, with a circular icon containing a cursor arrow pointing left overlaid on it. The main title "Professional Development" is centered over the banner. Below the banner, a secondary navigation bar shows links for SERVICES, EARLY CARE & EDUCATION PROFESSIONAL DEVELOPMENT, and other categories. The main content area has a sidebar titled "Early Care & Education Professional Development" with a list of links: Introduction, I'm an Early Learning Provider, Professional Development Strategies, Workforce Development, Education & Scholarships, MERIT, and Newsletters and Webinars. The main content area features a quote: "We support the adult educators who care for and teach young children in Washington State." It also includes sections for Vision and Mission, each with a red circular icon.

Washington State Department of
CHILDREN, YOUTH & FAMILIES

Safety • Services • Our Practice • Tribal Relations • About •

Professional Development

EARLY CARE & EDUCATION PROFESSIONAL DEVELOPMENT

Early Care & Education Professional Development

- > Introduction
- > I'm an Early Learning Provider
- > Professional Development Strategies
- > Workforce Development
- > Education & Scholarships
- > MERIT
- > Newsletters and Webinars

We support the adult educators who care for and teach young children in Washington State.

Vision

Mission

Isku Duwaan Geli Wergeyskeena

Korinta Shaqaalaha, waxaa weeye isha dhamaan shakhsiyadka shaqeeya ee bixiya taageerooyinka waxbarashada xirfadlaha ee shaqaalaha waxbarashada hore.

Wargeysa PD waxaa loogu telo geley in uu la socodsiiyo bulshada waxbarashada hore ee Washington dhamaan shaqooyinka Hormarka Xirfadlaha ah.



Eeg Iyaga

Liiska dhamaystiran ee wargeysa waxaa laga heli karaa [boga Wargeysa iyo Webinarka](#). Si aad isku duwaan geliso, iimeel u dir [Marlene White](#).

Fariin ka socota Xogyahaha DCYF



Xog Hayaha DCYF Ross Hunter waxay la wadaagi doontaa fariimaha bishii bixiyayaasha ee macluumaadka ugu danbeeya iyo wararka ku saabsan shaqada hay'ada. Waxaad akhridaa fariintiisa ugu danbaya oo [waxaad riixdaa halkan si aad ula socoto](#).


- [Wargeyska Abriil](#)
- [Wargeyska Maarso](#)
- [Wargeyska Febraayo](#)

Hadii aad heysos wax suaalo ah ama faalooyin, fadlan la xidhiidh DCYF [Xafiiska Xidhiidhada](#).

Coronavirus - Macluumaadkiisii Ugu Danbeeyay ee COVID-19

DCYF waxa ay leedahay websayt u gaar ah [Macluumaadka Ugu Danbeeya ee Coronavirus - COVID-19](#).

Su'aalaha la xidhiidha COVID-19 waxaa loo diri karaa dcyf.covid-19@dcyf.wa.gov. Sanduuqan maalin kasta aaya lala socdaa.



Wax ra'yi ah!



Fadlan noo sheeg sida aanu wax u wadno adiga oo galaya [xog uruurintan kooban](#).

Hadii aad ka qabto su'aalo ama aad nala socodsiinayo mawduuc waxa aad la xidhidhaa [Marlene White](#).